**Gobolka Vestfold**

# Heshiiska ku saabsan amaahasho laptop iyo amaahasho agab waxbarasho, buug iyo agab kale oo lacag la'aan ah una dhexeeya

## Gobolka Vestvold

(ORG.NR.929882385)

(magaca ardayga)-(dhalashada ardayga)

## 1. Guud ahaan

### 1.1 U dhexeeya

Heshiiska waxaa wada galay gobolka Vestfold iyo ardayga amaahday kumbiyuutarka/nettbrett,agab waxbarasho oo lacag la'aan ah iyo qalab kale.

Hadii uusan ardaygu qaangaar ahayn, heshiiska waxaa lala galayaa mas'uulka ardayga isagaana mas'uul ka ah wixii la amaahaday.

Markaan saxiixo, waxaan xaqiijinayaa inaan akhriyay nuxurka dukumeentigan oo aan aqbalay shuruudaha maamulka gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardaygu ula dhaqmayo PC/ tablet-ka ardayga (oo hadda loo yaqaan PC) iyo agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah.

Xidhiidhka amaahda ee ka dhexeeya maamulka gobolka iyo ardayga waxa nidaaminaya shuruudaha heshiiskan.

Heshiiska waxaa lagu saxiixayaa si dijitaal ah halkan:

https://elevkontrakter.telemarkfylke.no

1.2. xuquuqda/qalabka waxbarashada sida heshiiska ku qoran waa hantida gobolka,ardaygu wuxuu leeyahay oo keliya xuquuqda isticmaalka xilga amaahashada.

## 2. Amaahashada kumbiyuutarka la qaadan karo

### 2.1. Qalabka kumbuyuutarka iyo barnaamijku wuxuu daboolay

Nidaamaka wuxuu daboolayaa bæreba pc/Nettbrett/macbook, jaarjer iyo qalab kale oo dheeraad ah,hadii wax la yeelo ama la lumiyo shuruudaha heshiisku wuxuu khuseeyaa sidoo kale kumbiyuutarka la amaahdo.

Borogoraamadan soo socda baa lagu rakibayaa kaas oo ay weheliyaan nidaamka hawlgalka:

- Barogaam taageerida wax lagu qoro (office365)
- Barogaamka antivirus-ka
- Boorogaraamo kale oo iskoolku u isticmaalo waxbarashada

### 2.2. Isticmaalka qalabka

Waajibaadka ardayga:

- Waa in la hubiyaa in qalabka laga ilaaliyo waxyeelada iyo in la xado (tusaale ahaan lagu xafido khaanad la xiri karo, marka la soo qaadayana boorso lagu rido. lana isticmaalo bac roob,boorso gacmeedna lagu qaado marka lala safrayo).

- Cid kale ha amaahin kumbiyuutarka,meelna ha uga tegin iyada oo aan cidi ilaalinayn.
- Hana soo dejin waxyaabaha wax yeeli kara ama barogaraamo kale
- Waxba ha ka bedelin,hana koobiyayn borogaraamadii hore loogu diyaariyey kumbiyuutarka iyada oo aadan ogolaansho gaar ah ka haysan iskoolka
- Ku hubi in aad soo koobi garaysid waxyaabaha la xiriira dhanka bed-.qabka
- Ha ka tirtirin mashiinka calaamadaha (noocyada calaamadaha ah,nambarka wershedu ku samaysay iyo wixii lamid ah
- Adigu wax calaamad ah ha ku samayn mashiinka ama waxyaabaha lagu dhejiyo

Haddii virus/borogaraam dhaawacaya looga shakiyo ama la ogaado isticmaalka aan caadiga ahayn kumbiyuutarka, koontada ardaygu waa la xirayaa. Ardaygu waa inuu la xiriiraa xafiiska kumbiyuutarda si dib loogu eego oo dib loogu rakibo kombuyutarka.

Maamulka gobolku waxa uu xaq u leeyahay in uu isticmaalo software si uu ula socdo dhaq-dhaqaaqa shabakada iyo codsiyada kombayutarka ardayda oo kali ah xilliyada imtixaanada. Ujeeddadu waa in laga hortago qishka oo la ogeysiiyo wax ku saabsan software-ka aan la ansixin ee ku jira kumbiyuutarka ardayga. Xuquuqdan kormeerku waxay ku kooban tahay xiliyada imtixaanada mana khusayso wax ka baxsan xilliyadan

Ardaydu ma helaan xuquuq maamul oo ay ku amaahiyaan kombuyuutarada.

Isticmaalka waxaa nidaamiya xeerarka maamulka gobolka ee dugsiyada sare.

## 2.3. **Burbur iyo khasaare**

Dhamaan ciladaha qalabka sidoo kale waxyeelada ama lumida waa in lagu wargeliyaa iskoolka sida ugu dhakhsiiyaha badan ee ugu suurtagalsan ugu danbayn 14 maalmood gudohood.

Ardaygu waa in aanu isagu iku dayin in uu isagu hagaajiyo waxyeelada, laakiin uu u daayaa iskoolka.hagaajinta ay samayaan adeegayaal aan la ogolayn waxay keeni kartaa in aan khasaarahaas la daboolin/bixin.

Khasaaraha ama waxyeelada ay keento dayacaad/ taxadar la'aan ama ulajeedka dhanka ardayga waxaa si buuxda loogu dalacayaa ardayga/masuulka ardayga. Haddii kombuyuutarku uu dhaawacmo ama uu lumo dayacaad ama ujeedo awgeed, ardayga/masuulka ardaygu waa inuu daboolaa dayactirka ama uu bixiyaa qiimaha haraaga kumbiyuutarka iyadoo la raacayo tilmaamaha hadda jira ee maamulka gobolka.

Tusaalooyinka dayacadu waxay noqon karaan (liisku ma aha mid dhamaystiran):

- In isku boorso ama kiis aan ku haboonayn lagu wada rido cabitaanka ama dareeraha
- Ku isticmaal meelaha aan ku haboonayn (tusaale ahaan meel ciid ah,biyo,wax lagu alxamayo ama mashiino kale oo dhaawac u keeni kara kumbiyuutarka sida wershed iyo wixii la mid ah)
- In aad dhigto kumbiyuutarka meel aadan adiga ama ardey kale ilaalinayn
- Hadii aad taxader la'aan muujiso marka aad gaadiid la raacaysid
- Hadii uu ku waxyeeloobo meel aan haboonayn oo aad dhigto kumbiyuutarka oo adiga ama qof kale ku fariisto
- Hadii aad dhigto meelayn aan haboonayn, tusaale ahaan, meel koraysa, sagxada ama gees, iwm.

2.4. Hadii ay dhacdo waa in uu ardaygu si degdeg ah ugu war geliyaa booliska,iskoolkana waa in loo keena nuqulka xatooyada.

Hadii lagu xado meel gaar ah ama goobaha dadweynaha oo uu ku jiro iskoolku waxaa ka masuul ah ardayga/waalidka ardayga in ay bixiyaan , tusaale ahaan waxay isticmaali karaan caymiskooda,waxaanu ku talinaynaa caymiska wixii la xado.

## 3. Amaahda agabka waxbarashada oo lacag la'aan ah, buugaag iyo agabka kale

Heshiiskani wuxuu khuseeyaa dhammaan sanad-dugsiyeedka ama hal sannad-dugsiyeedka markiiba si loo helo qalab waxbarasho, buug iyo agab kale oo lacag la'aan ah.

Dhammaan agabka uu ardaygu amaahday waa hantida iskoolka.

Hadii la joojiyo iskoolka, ama maadooyin ama dugsiga la joojiyo, dhammaan agabka waxbarashada waa in lagu soo celiyaa iskoolka. Waa in qalabka waxbarashada oo dhan dib loogu soo celiyaa iskoolka.Qalabka waxbarasho ee aan dib loogu soo celin wakhtiga lagu heshiiyey ayaa loo arkaa inay lumeen waxaana loo soo dirayaa ardayga/masuulka qaansheegad iyadoo loo eegayo qiimaha lacagta ee hadda jira.

Buugaagta kale iyo qalabka kale ayaa si joogto ah loo soo xeraynayaa sannad dugsiyeedka oo dhan iyadoo la raacayo shuruudaha iyo jadwalka caadiga ah.

## 3.1 Sida loola dhaqmayo agabka laga soo amaahday adeegga maktabadda iskoolka.

Dhammaan amaahashada waa in lagu diiwaan geliyo nidaamka amaahashada ardayga ee maktabadda.

### Waajibaadka ardayaga:

- Waa in qalabka wax lagu barto si xilkasnimo leh loola dhaqmo si aanay u soo gaadhin jeexjeex iyo dhaawac aan loo baahnayn
- Waa in aanad isticmaalin calaamadeyn, hoosta ka xariiqin qoraalka ama ku qorid qoraal buugaagta la amaahday
- Ku daadal in aad ilaaliso calaamada kuudaha ee/**RFID**

## 3.2 Lumid iyo dhaawac

Haddii ay dhacdo lumin, burbur ama burbur ku yimaadda agabka waxbarashada, ardayga/masuulka ardayga ayaa leh mas'uuliyadda buuxda ee magdhowga.

Vestfold
FYLKESKOMMUNE

Sheegashada magdhowga laga noqonmaayo xitaa haddii agabka waxbarashada la keeno ka dib wakhtiga kama dambaysta ah. Xaalado gaar ah, sheegashada magdhowga waa laga dhaafi karaa.

## 4. Saxiixida

## Heshiiska amaahashada laptop/ kumbiyuutarka, agabka waxbarashda oo lacag la'aanta ah, buugaag iyo agab kale.

Waxaan xaqiijinayaa inaan akhriyay waxa ku qoran dukumeentigan.
Saxiixayga, waxaan aqbalay shuruudaha maamulka gobolka iyo hab-raacyada isticmaalka iyo maaraynta PC-ga ardayga iyo shuruudaha iyo hab-raacyada isticmaalka iyo maaraynta agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah ee la amaahday, buugaag iyo agab kale.

Haddii ay dhacdo sheegasho magdhow ah oo ay sabab u tahay soo celin la'aanta kumbiyuutarka ee ardayga, agabka waxbarashada lacag la'aanta  ah, buugaagta iyo agabka kale ama dayacaad si waafaqsan heshiiska, ardaygu wuxuu heli doonaa qaansheegad. Haddii ay dhacdo lacag-bixin la'aan, ardaygu wuxuu heli doonaa xasuusin qoraal ah oo ka imaanayso xafiiska ururinta deynta (inkasso). Degmada waxay u wareejin kartaa xaqa lacag dalbashada  xafiis kale.

Ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano jir, masuulka u saxeexay kiraystaha ayaa masuul ka ah wixii qaan sheegasho  lacag aan la bixin ah.

Vestfold
FYLKESKOMMUNE

Xeerarka magdhowga guud ee Norway ayaa khuseeya isticmaalka iyo habaynta kombiyuutarka. Waxaad si buuxda mas'uul uga tahay magdhow haddii ay dhacdo khasaare, xatooyo ama dhaawac, hadii la dayacay. Hadii sidoo kale la lumiyo, xado ama burburiyo, waa inaad bixisaa qayb lacagta ah, hadii la hagaajinayo ama mashiinka aad gudaysaan.

Gobolka Vestfold
Meesha iyo taariikhda: Tønsberg august 2024

Liv Marit Hansen
Maamulaha waxbarshada iyo caafimaadka ilkaha

**Ardayga iyo ma'uulka**

| **Meesha iyo taariikhda** | **Ka yar 18 sano- waxaa saxiiixaya ma'uulka:** |
|---|---|
| Magaca ardayaga ( ku qor far waaweyn) | Magaca mas'uulka ( ku qor far waaweyn) |
| Saxiixa ardayga | Saxiixa masuulka |